

Muddada karantiilka laga dhaafayo qof covid-19 hore ugu dhacay marka uu u dhawaado qof covid-19 laga helay waxa laga dhigay 12 bilood halkii ay markii hore ahaan jirtay 6 bilood

Dadka uu Norway ku dhacay cudurka covid-19, 12 bilood ayaa laga dhaafayaa in ay karantiil galaan haddii cudurka laga helo qof ay u dhowaadeen. Shahaadada koroonaha ee waddanka gudahiisa ayaa la cusboonaysiinayaa, oo 12 bilood ayay cagaar ahaanaysaa marka uu qofka ku dhoco cudurka covid-19.

Wixii hadda ka horreeyay lix bilood ayaa karantiilka laga dhaafi jirey qofka covid-19 hore ugu dhacay ee u dhowaada qof cudurka covid-19 laga helay. Taas oo ku xirnayd in ay hay'adaha caafimaadka ee norwiijigu qofka cudurka ku caddeeyaan. Dawladda ayaa hadda muddadaan kordhisay oo ka dhigtay 12 bilood. Is-beddelkaan ayaa dhaqangelaya laga billaabo saqda dhexe 28-ka ogoosto 2021.

– Waxaan hadda helnay aqoon fiican oo noo sheegaysa in dadka uu covid-19 ku dhacay in ay ugu yaraan 12 bilood si fiican u difaacan yihiin. Sidaas darteed ayaan u kordhinaynaa muddada dadkaas laga dhaafayo karantiilka u dhowaashaha qof cudurka laga helay, ayuu yiri Bent Høie oo ah wasiirka caafimaadka- iyo daryeelka.

Shahaadada koroonaha ee waddanka gudahiisa ayaa la cusboonaysiinayaa, oo 12 bilood ayay cagaar ahaanaysaa marka uu qofka ku dhoco cudurka covid-19.

Waxaa la filayaa in nidaamkan la diyaariyo ka hor 9-ka sibteembar.

Agaasinka Caafimaadka iyo Machadka Caafimaadka Dadweynaha ayaa ku taliyay wax-ka-beddelistaan.

Dadka uu ku dhacay cudurka Covid-19 sidaas si la mid ah looga dhaafi maayo karantiilka soo gelidda waddanka. Sababta oo ah in aan Midowga Yurub oggolayn in uu shahaado koroone ku bixiyo cudur qofka laga helay wax ka badan 180 maalmood hortood.

Shaqo badan oo xagga sancada ah ayay u baahan tahay samaynta nidaam lagu kordhinayo muddada dadka laga dhaafayo karantiilka soo gelidda waddanka, islamarkaana dad yar ayay wax u taraysaa wax-ka-beddelistu. Dadka waaweyn ee kooxdan ku jira tallaal ayay qaadan karaan oo sidaas ayaa looga dhaafi karaa karantiilka soo gelidda waddanka, meesha ay carruurta haddaba soo gaabin karaan muddada karantiilka haddii saddex maalmood kaddib laga qaado tijaabada PCR – oo cudurka laga waayo.

– Waxaa muhiim ah in si la hubo loo caddayn karo in uu cudurku qofka ku dhacay, sida ugu wanaagsan ee lagu caddayn karana waa ayada oo la isticmaalo shahaada koroona ee Midowga Yurub. Haddii uu Midowga Yurub is-beddel ku sameeyo muddada ay shaqaynayaan macluumaadka cudurka covid-19 ee ku qoran shahaadada koroona, markaas ayay dawladdu dib u eegi doontaa xeerarka karantiilka soo gelidda waddanka, ayuu yiri Høie.